BAYAANKA HEESHIKA

Heshiskaan oo la sameyay maalintaan 4aad ee Diseembar, 2003 ayna sameyeen kana dhaxeya Kooxda Midowga Dhaxdhexaadinta Jaaliyadaha (Unity Community Mediation Team) iyo Waaxda Boliiska Minneapolis (Minneapolis Police Department).

HORUDHAC

Kooxda Midowga Jaaliyadaha (Unity Community Team) iyo Minneapolis oo dhaxmaray heshiiskan in lagu ilaaliyo amniga iyo xaqa aadanaha, xaqa madaniga, iyo xaqa sharciga ay u leeyiiin dhammaan deganayaasha Minneapolis, ayadoon dan laga lahayn midabka, asalka, dhalashada qaran, diinta, luqadda, sharciga lagu joogo, jinsiga, jinsi doorashada, da'da, dhaqaalaha ama xaaladaha itaaldarrida.

Waan cambaraynaynaa nidaam fasaxaya kadeedka iyo jirdilka meel kasta oo ay ka jiraan. Haddaan bulshada ka helno waan la dagaallamaynaa. Haddaan boliiska ka helno waan la dagaallamaynaa. Waxaan ka camabaraynaynaa kuwa caadaystay midab kalasooca meel kasta oo uu ka jiro. Haddaan bulshada ka helno waan la dagaalamaynaa, Haddaan boliiska ka helno waan la dagaallamaynaa.

Waxaan ku heshinnay inaan isla shaqayno si aan u dhowrno nafta, sharafta, caafimaadka iyo ammaanka dhammaan daganayaasha Minneapolis; inaan sii wadno wadahalka lagu hagaajinayo shaqada boliiska, in la hubiyo meelkadhaca ay boliiska u gaysta xaqa ay leyihiin daganayaasha Minneapolis lagu dhammeyo si cadaalad ah; la wanaajiyo heerka kartida, tababarka, kala duwanaanshaha midabka iyo jinsiga ee ka jira dhammaan heerarka Waaxda Boliiska Minneapolis, iyo in la wanaajiyo cilaqaadka u dhaxeya jaaliyadaheena iyo waaxahooda boliiska iyo Magaalada Minneapolis.

Boliiska waxaa loo dhaariyay inay sharciga raacaan hawshoodana ku fuliyaan ayagoon eegin midabka. Hadduu midabka noqdo waxa uu boliiiska ficil ka muujiyay, arrinkaan waxay si wayn u qusaysaa jaaliyadda iyo waaxda. Xogta ay soo qoreen Guddiga Garsoorka iyo Dembiyada (Council on Crime and Justice) ee soo baxay Sateembar 24, 2003 "Minnesota Racial Profiling Study", ayaa kor u qaaday walaacaan qasabtayna in loo gudogalo. Boliiska waxaa lagu aaminay awood aab u ballaaran masuuliyada wayna ay ka saarantahay sida u gutaan xilka guud ahaaneed. Saraakiisha MPD waa inay muujiyaan karti her sare ah oo mudnaansho sharaf leh ka filayso jaaliyaha ay u shaqayaan.

Dhaxdhexaadiyaha Federaalka, Patricia Glenn, waxay la kulantay labada dhinacba si ay u fadudayso dib u habayn, la isdhaafsado aqbaarta iyo fikradaha, iyo abuurka xal ay labada dhinacba heshiis ku yihiin inay ku hormarinayso ujeedadooda ku aaddan si lagu wanaajiyo tayada nolosha ay Minneapolis ku haystaan iyo rajada laga qabo inay taasi u ahaan doonto bilow cusub ee wadahadal waxtar badan ka muujiya mowduuca ku taxluuqa waxqbadka boliiska uu dhaxmaro Magaalada Minneapolis, Waaxda Boliiska Minneapolis iyo daganayashaa magaalada.

Annago ah hormoodka jaaliyadaha iyo boliiska ayaan hadda dooranay inaan fursaddaan ka faa'idaysanno inay labada dhinac isu soo dhowaadaan. Tan dhammaad uma aha dhibaatoyinkeena oo idil. Tani dhammaad uma aha carada iyo niyadjabka. Tani waxay tahay bilow – fursad lagu dhisayo isfaham dhaxmara boliiska iyo jaaliyadaha oo habayn kara xoojinta sharciga, habayn kara ammaanka guud, iyo habayn kara iskaashiga xoojinta sharciga. Ugu dambayntii tan waxay kor u qaadaysa tayada nolosha ee qofkasta ee magalada deggan.

Heshiska soo socda waxaa loo arkaa inuu yahay tillaabada ugu horreysa ee wax looga qabanayo cabashada taariiqiga ah oo ay jaaliyadaha qabaan. Bilowga kasooraynta ku aaddan hawlaha boliisku qabto ee ku yaala heyshiiskaan waa tillaabada ugu horreysa ee wadahal socda oo kasoorayn dheeraad ah ku kordhin doona hawlaha boliiska ee ku aaddan ammaanka guud iyo ammaanka iyo kartida waaxda boliiskeena. Labaduba waxay ku heshiyeen waxa soo socda:

HESHIISKA

WIXII HADDA KA DAMBEEYA, WAXAAN HALKAAN KU HESHIINNAY SIDA SOO SOCOTA:

Qaybta 1. Isticmaalka awoodda. MPD way garwaqsadeen in marka uu boliisku xoog isticmaalo inay taasi walaac ka muujiyeen dadka deggan Minneapolis iyo in dad badan uu midabkooda madow yahay, Afrikaan Amerikaan ah, dumarka, Hindi Amerikaan, iyo xubnaha ka tirsan jaaliyadda GLBT, iyo xitaa dadka madaxa looga jiro ay si gaar ay dhibaata kaga soo gaarta isticmaalka xoogga ee askarta boliiska. MPD way amiinsayihiin doorka uu muhiimka ah ay leedahay waxbarashada, tababarka, iyo xitaa dishibliinka wax looga qabto walaacaas. Sidaa awgeed, dhinacyadu waxay ku heshiyeen siyabaha u bannaynaya inay askarta boliisku MPD ay xoogga ku isticmaalaan.

1.1 *Sababta loo Isticmaalayo Xoogga.* Qawaaniinta aasaaska u ah marka isticmaalka xoogga ay lagama maarmaan tahay waxay ku qorantahay Dastuurka Minnesota iyo sharciyada ku aaddan. MPD waxay heshiis ku tahay inaysan cabsida midabka ama dhalashada qofka u bannaynaynin inay xoogga isticmaalaan.

1.2 *Qawaaniinta la Xiriira Isticmaalka Xoogga.*

1.2.1 *Qawaaniinta Istcmaalka Xoogga.* Dastuurtka Minnesota ayaa amraya in aysan waaxdu boliisku isticmaalin qawaaniinta xoogga oo ka adag midka u sharciga qorayo. Ku dabaqidda sharcigaan ayaa maamulaya isticmaalka xooga ee MPD oo ku salaysan qawaaniinta gobolka iyo sharciga federaaliga ee lagu dabaqayo.

1.2.2 *Warbxixinta Layska Rabo.* MPD waxay ogoshay inay dhowrto qawaaniinta dhahaya inuu askariga boliisku uu warbixin ka soo qoro markasta oo uu xoog uu isticmaalo. Qaanuunka waxaa lagu qeexaya oo hoos imaanaya marka uu dhaco iska horimaad uu askariga boliisku waxa uu u isticmaalay ay xoog ahayd:

- Hub, gaari, waxyaboo aan loo dhimanaynin, feer ama qacanqaad.

- Marka qofka la jeebaynayo oo u ku dhawaacmo ama loo anaynayo inuu ku dhaacwamay. Kuwaan waxaa kamid ah xiritaanka iyo shilaal aan xiritaanka ahayn.

  Saraakiisha boliiska oo idil ee ka qaybqaatay shilalka xoog lagu isticmaalay waxa laga rabaa inay warbixin buuxda ay ka soo qoraan. Waxaa inta dheer oo laga rabo inay diyaarinta warbixin qoraal ah, qaanuunka laga rabay inuu askariga raaco oo dhahaya marka uu askariga boliisku isticmaalo xoogga waa inay isla markiiba ay u soo sheegaan sarkaalka ugu sokeeya ee ka sarreeya. Qanuunka wuxuu kaloo ka rabaa in sarkalka sare uu eego shilka dhacay si loo tixgaliyo qaanuunka iyo habka MPD ee gobolka.

1.2.3 *Ceegada.* MPD waxay ogolaatay inay isticmaalka ceegada uu yahay xoog geeri sababaya. Qaanuunka ay MPD isticmaasho ayaa ah inay mamnuuc tahay in la isticmaalo ceegada marka laga reebo xaalado la fasaxay oo xaalad geeri iyo nolol ay meesha soo gasho.

1.3 *Xoojinta Qaanuunka Isticmaalka Xoogga.*

1.3.1 *Waxa ka Imaanaya marka la jabiyo.* Askariga raaci waayo iyo dhowri waayo qaanuunka ku yaala Buugga MPD, ay kamid yihiin qaanuunka horay la soo hadalqaaday ee ku saabsan isticmaalka xoogga, waxaa laga qaadayaa tillaaboyin dishibiliin ah.

1.3.2 *Baarista iyo Dib u Eegista Isticmaalka Xoogga Lagu Dhimanayo.* Kiis kasta ee uu askariga MPD uu ku isticmaalay xoogga lagu dhimanayo waa la baaraya si lagu ogaado hadduu isticmaalka xoogga lagu dhimanayo uu ahaa mid uu sharciga ansaxayo. MPD waxay eegi doontaa kiis waliba ayadoo ujeedadu ay tahay dhowritaanka qaanuunka.

1.4 *La Yareeyo Isticmaalka Hubka Waxdila.* MPD waxay xaqiijinaysaa in dhammaan isteeshinadu ay haystaan tiro ku filan ee hub aan halis ahayn iyo in kuwa isticmaala hubka noocaas ay tababar u haystaan. Waqtiga la joogo, MPD waxay sii wadaysaa inay isteeshiin waliba ay qiyaastii siiso hubka nooca ah 40mm iyo in Kooxda Xallisa Shidada (Crisis Intervention Team) (ahaanaysa CIT) iyo TASER. MPD waxay sii wadi doonta sahanka ay ugu jirto qiimaynta hub aan waxdilin ee casri ah oo ay isticmaalaan shaqaalaha ammaanka. Marka ay ku habboontahay MPD waxay casrinaysaa iyo/ama kor u qaadaysaa hubkeeda aan waxdilin.

1.5 *Xakamaynta Dadka Dagaalka Badan.* Mararka qaarkood si qofka loo celiyo gacma kaqabdku kuma filla sii uusan qofkaan dagaalka badan uu dhawac u gaysan isaga/ayada amaba dad kale.

1.5.1 *Tabta Sare ee Xakamaynta.* Tabta Sare ee Xakamayntahe (MRT) waa xakaym xarig uu isku xiro lugah (iisa/eeda) kaaso maraya dhinaca hore ee raaciyaha dagaalka badan ilaa suunka am xarigga dhexda lagu xirto ee dhexda axadka. MRT uma ay keneyso wax halis ee la xiriira neefsashada xita marka uu si toos ah uu u fadhiyo ee gaariga lagu wado. Sida awgeed, raaciyaha lagu xakameyay MRT waxaa dhici in gaariga boliiska lagu qaado. MPD waxay joojin doonta isticmaalka “flex cuffs” oo si sare wax u xakamaynaya raaciyada haddaan fursado kale ee lagu badalo siiba marka dad badan la soo xirxiro. MPD waxay askari waliba ay siin doontaa qalabka xakamaynta ku habboon.

1.5.2 *Hobble.* Waa xakamaynta dhinaca dambe ee laysku xirayo gacmaha iyo lugaha raaciyaha. Xakamaynta noocaan waxaa la isticmaala marka aan la haysan nooc kale ee xakamayn ah. Markasta oo xakamayna hooble la isticmaalo, horjoogaha waa inuu goobjoog ka ahaado. Raaciyaha lagu xakamayay in xibnaha gadaal laga xiro waxaa lagu qaadi karaa oo kaliya ambalaas.

1.6 *Lama Ogola in Gaariga Boliiska K-9 La Rakaabiyo.* MPD ma qaadayso ama dad kuma xirxirayo gaariga ayga lagu hayo laguna qaado (K-9).

Qaybta 2. Cilaaqaadka Boliiska - Jaaliyadaha. Mid kamid ujeedada ugu muhiimsan ayaa gebiahaamba ah in la dhaxdhexaadiyo cilaaqaadka u dhaxeeya MPD iyo jaaliyadaha. Sida ay cilaaqaad waliba ka jirto, dhammaan qaybaha waxay masuuliyad ka saarantahay inay ka wada shaqayaan sidii loo wanaajin lahaa isgaarsiinta, kalsoonida iyo xushamadda ee cilaaqaadkaasu uu leeyahay. Qaybaha Heshiiskaan ayaa aqoonsaday waxyabaha soo socda ee loo baahanyahay in la wanaajiyo cilaaqaadka u dhaxeeya MPD iyo jaaliyadaha.

2.1 *Dhisidda Guddiga Cilaaqaaka Boliiska iyo Jaaliyadda.* Dhinacyadda waxay halkaan ku heshiiyeen inay dhisaan Guddiga Boliiska ee Cilaaqaadka Jaliyadaha (PCRC). PCRC waxay ka koobnaan doonta ilaa 30 xubnood, 18 kamid ahna ay soo dooroto UCMT, 12ka boos ee harayna uu buuxiyo madaxa boliiska. Dad wax eegeega waa lagu dari doona waxaana kamid noqon doono Duqa Magaalada, Golaha Magaalada, iyo Waaxda Xuquuqda Madaniga ee Minneapolis.

2.2 *Masuuliyadaha PCRC.* Masuuliyadaha ay PCRC yeelan doonto waxaa kamid ah balse aysan ku koobnaan doonin:

2.2.1 Inay dhowrto dushana kala socoto hirgalinta heshiiska dhaxdhexaadintan;

2.2.2 Samayn warbixin xilliyeed ee hirgalinta dhaxdhexaadinta heshiiska;

2.2.3 Aqoon kororsi jaaliyadaha laga siyo meelaha ay kala xiriiraan heshiiskaan;

2.2.4 Lala eego heshiiska dhexdhexaadintaan ninka badali doono Taliyaha Boliiska Robert Olson iyo in taliyaha cusub lagala shaqeeyo hirgalinta Heshiiska;

2.2.5 Qabashada shirar joogto ah ee ku saabsan xiriirka ka dhaxeya MPD iyo jaaliyadaha kuna wajahan ammaanka iyo kalsoonida guud ay dadka u qabaan MPD;

2.2.6 Ilaalinta la xiriira misaaniyadda heshiska dhaxdhexaadinta;

2.2.7 Samaynta xeerar iyo maamul shaqayn kara ee PCRC ee ku saabsan waxyaabo ay kamid yihiin balse aan ku koobnayn muddada xafiiska xubnaha PCRC, waxyabaha layska rabo iyo marka ay dhacdo fawdo, qaabka loo buuxiyo jagooyinka bannaan, iyo jadwalka loo sameeyay kulamada PCRC;

2.2.8 La shaqaynta MPD iyo shilalka xaasaasiga ee jaaliyadaha shilalka ka soo ifbaxaana eedaha la xiriira, basar xumida xubnaha sare ee boliiska, xasiloonidarrida guud iyo waxyaabaha saamayn xun ku reebi kara xiriirka u dhaxeeya MPD iyo jaliyadaha si loo dhiso hab-maamuuska looga jawaabayo shilalka, kuwaaso xubnaha PCRC ay soo oogi karaan;

2.2.9 La fududeeyo wadahadallada socda kuna saabsan qoomiyadaha iyo jinsiyadaha iyo qaababka kale ee kala duwanaanshaha;

2.2.10 La dhiso lana sii wado shirarka jaaliyadaha kaaso ay MPD iyo UCMT labadoodaba ay ku soo bandhigayaan warbixinno;

2.2.11 Dhisidda iyo sii wadidda wadashaqaynta ka dhaxaysa xiriirka ka dhaxeeya MPD iyo Jaaliyadaha waaxyahooda arrimaha la xiriira sida carbinta, xeerarka iyo hababka iyo tababarrada jaaliyadaha;

2.2.12 Kobcinta hab-maamuuska isgaarsiinta iyo la xiriiridda warbaahinta arrimaha la xiriira shaqada ay qabanayaan PCRC, shilalka xaasaasiga ah; dambiyada ay galaan saraakiisha sar sare; iyo moowduucyo kale oo ay PCRC ogaato;

2.2.13 Xilli waliba la martigaliyo shirarka guud oo la xiriira adeegsiga xoogga dhimashada keena oo saraakiisha isticmaasho sababo la xiriira dib u eegista gebagebada baarista iyo laga jawaabo su'aalaha iyo walaaca ay shacabka ka qabaan falal qaas ah; iyo

2.2.14 Soo qadimidda hawlo kale oo ay suurtagal tahay in dhinacyada si wadajir ah ugu heshiiyaan markasta.

2.3 *Masuuliyadaha MPD ee ku wajahan PCRC.*

2.3.1 MPD waxay soo saaraysaa si weyna ula qaybsanaysaa madaxda jaaliyadaha waaxyaha istratijiga carbinta iyo misaaniyadda.

2.3.2 MPD waxay hubinaysaa in dhaqaalaha ku filan laga hirgaliyo ujeedooyina laga lahaa iyo inay dhagaystaan sida loo bixiyay lacagtaas oo u soo gudbiyaan PCRC.

2.3.3 MPD waxay diyarinaysaa wixii laga kabi lahaa maamulka PCRC.

2.4 *Masuuliyadaha Jaaliyadaha ee ku aaddan PCRC.* Wakiillada Jaaliyadaha ee ka tirsan PCRC waa inay:

2.4.1 La shaqayaan madaxda ururrada jaaliyadaha ayna taageerada uga raadsadaan si ay uga qaybqaataan barnaamijyada MPD ee ku saabsan kahortagga dambiyada.

2.4.2 La shaqayaan madaxda ururrada jaaliyahada iyo inay xubnaha jaaliyadaha sida ay ula shaqayn lahayeen baarisyada socda.

2.4.3 Ku dhiirigaliyaan madaxda ururrada jaaliyadaha si ay ula shaqayn lahayeen MPD iyo dib u eegista dhaawacyada ay boliisku ka soo gareen xilgudashadooda iyo sahminta dadaallo wadajir ah si loo yareeyo dhaawacyadaasi.

2.5 *Dhisidda Kooxda Isku-xirka Cilaaqaadka Jaaliyadaha.*

2.5.1 MPD ayaa dhisaysa Kooxda Isku-xirka Cilaaqaadka Jaaliyadaha. Kooxdu waxay ka koobantahay qaybaha kala duwan ee saraakiisha boliiska oo loogu talagalay una tababaran inay xoojiyaan xiriirka u dhaxeeya MPD iyo jaaliyadaha.

2.5.2 Ujeedoyinka ugu weyn ee kooxda CRC waxay tahay inay la shaqayso ururadda jaaliyadaha iyo madaxda ee ka tirsan Waaxda si loo dhiso cilaaqaad ku salaysan waxiswaydaarsi faa'iido leh ee dhaxmara dhammaan dhinacyada oo dhami intii laysku mashquulin laha halista ama baarista falalka dembiga.

2.5.3 Waajibaadka gaarka u ah Kooxda CRC waxaa soo dajinaya MPD, ayaga oo ay wehliso PCRC.

2.5.4 Isuduwaha Kooxda CRC waa inuu warbixin toos ah uu u soo gudbiyaa Taliyaha MPD.

2.5.5 Dhisidda Shaqaalaha Xiriirinta Jaaliyadaha. Kooxda CRC ayaa waajibaad gaar ah ayadoo u xilsaaraysa shaqaalaha qaarkood wax lagu magacaabo "Xiriirinta Jaaliyadaha" iyo, ayagoo gacan ka helaya PCRC oo waajibaakooda u kala caddaynaysa.

Qaybta 3. Arrimaha Caafimaadka Dhimirka.

3.1 *Macaamilka ka Dhaxeeya Boliiska iyo Dadka Madaxa Looga Jiro iyo Kuwa Naafoobayo.* MPD waxay aqoonsantahay qaabka ay boliisku ula dhaqmayaan dakda madaxa looga jiro iyo kuwa naafaysan in uu saamayn weyn ku reebayo dadka ay la xiriiriyaan kaliya maahee balse arrintu ay taabanayso xiriirka MPD ay la leedahay jaaliyadaha oo idil. Sidaa awgeed, MPD waxey ogolaatay qodobada soo socda:

3.1.1 *Tusaalada ugu Fiican.* MPD waxay ogoshay in lasii wado qiimaynta iyo casriyaynta barnaamijka Kooxda Gurmadka Aafoyinka oo lagu daro tusaale wacan ee qaran oo loo qaateen ah.

3.1.2 *Shaqaalaynta.* MPD waxay ogoshay inay sii waddo tababarka CIT, iyaadoo ugu yaraan mid kamid ah CIT inay u kaltamaan si loo hubiyo askariga CIT in markasta laga helo kana jawaabo waxkasta oo ka dhaca magaalada dhaxdeeda.

3.1.3 *Kala Duwaanaanshaha Kooxda CIT.* MPD waxay si waxku ool ah carbinaysaa, dhirrigalinaysaa dumarka dheeraada, saraakiisha kala midabyo ah, Hindida Amerikaanka in lagu oo biiriyo Kooxda Gurmadka Aafoyinka ("CIT"), si loo helo loona sii wado isku dheellitirka kala duwanaanshaha magaalada ka jirta.

3.2 *Fiyoobidda Saraakiisha Xilka La Saaray.* MPD iyo shaqaaleheedaba waxay ogyihiin in fulinta sharcigu xilgudashadaasu in mararka qaarkood ay ka imaan karto xaalado khatar ah iyo cadaadis xagga deegaanka naftoodana ay halis u noqon karto. Sidaas darted waxaa laga maarmaan u ah Waaxda si ay shaqaalaha iyo dadweynuhu u nabadgalaan in la hubiyo shaqaalaha ka hawlgalaya Waaxda inay nafsiyan caafimaad qabaan. MPD waa inay ficiliyan suurta gelisaa kala soo dhexbaxdo liiska dhakhaatiirta kala duwan ee cilmiga nafsiga oo baara saraakiisha la xilsaaray.

3.2.1 Waaxdu waxay waydiisan kartaa in la baaro shaqaalaha ku sifooba xaaladaha hoos ku qoran:

3.2.1.1 Markii ay jiraan shaki macquul ah oo loo aaminsanyahay shaqaaluhu uu nafsiyan ama dareen ahaan uusan caafimaad qabin siuu uu u guto waajibaadkiisa iyo xilkiisa. Shakiyadaas macquulka ah waa inay noqdaan kuwo lagu saleeyay aragtida ugu yaraan laba ka tirsan madaxdiisa ama kuwa la shaqeeya kuwaaso aqoon fiican u leh am ka tirsan madaxdiisa ama kuwa la shaqeeya kuwaaso aqoon fiican u leh ama xog-ogaalnimo siin kara madaxda in shaqaalahaasu uu had iyo jeer muujiyo waxyaabo caddeynaya in uu iksu buuqsanayahay; iyo in xaladahaas:

3.2.1.1.1 Ay ka hortagayaan si aanu qofaasu si rasmi ah xilkiisa/xilkeeda ay u gudato; iyo

3.2.1.1.2 Qofkaas lama daaweyn karo haddii aan loo helin dhakaaatiir takhasus gaara u leh arrintiisa.

3.2.1.2 Marka uu shaqaalahaasi uu galay shil aad halis u ah ayna dhacdo jaahwareer kaaso uusan nafsiyaan shaqada xamili karin sababo la xiriira dhaawaca soo gaaray.

3.2.1.3 Haddii shaqaaluhu uu nafisyaan shaqada xamili karin.

3.2.1.4 Marka shaqaaluhu dad xirfad leh ee Waaxda ka socda ay baaraan ama dhakhtar madax bannaan ay isku raacaan inay jiraan sababo sheegaya in loo baahanyahay in qiimaynta nafsiga loo baahanyahay.

3.2.2 *Qiimaynta Hababka Muujinta Dhaqanka Shaki Abuuri Kara oo Yaraynaya Kartida uu Shaqaaluhu Xilkiisa ku Gudan Karo.*

3.2.2.1 *Tillaabada 1*. Horjoogaha qofka shaqaalaha waa inuu shakhsiyaan la yeesho wareysi, si go'aan looga gaaro xaaladda jirta iyo hadii tallaabo kalo dheraad ah laga qaadi karo. Marka waraysiga lala yeelanayo waa in la siiyaa fursad uu ku faahfaahin karo xaalkiisa abuuray walaacan. Wareysiga ka bacdi qofka madaxda ah waa inuu:

- go'aan ka gaaroo inuu walaaca sal lahayn, isla markaasna aan wax u dhibayn gudashada xilkiisa ama xilkeeda rasmiga ah, ama arrinta ay tahay mid si kale wax looga qaban karo oo aan loo baahnayn in lala kaashado dhakhaatiir ama cid kale oo ku habboon daaweyntiisa; ama

- inuu kula taliyo shaqaalaha in ujeedada ninka madaxda ahi tahay eegmada ka soo rayntiisa shaqaalaha lala taliyo xaaladahaas iyo in lala taliyo danaha horjoogaha shaqaalaha uu kormeeri doono hawlaha gacanta uu ku hayo iyo in la eego hadduu horumar jiro; ama

- In lagula taliyo in Taliyaha Boliisku in qofka shaqaalaha in loo tixgaliyo waxyaabo lagu caawin karo sii uu xilkiisa u guto.

  Marka laga reebo xaaladaha duruufo gaar ah haddii qofka madaxdu uu go'aan ku gaaro in walaacu aanu jirin suxuu ku dhiirigalin karaa inuu la xiriiro Barnaamijka Caawimaada Shaqaalaha (EAP). Tillaabada 1 looma baahna haddii qofka ay soo fool leedahay khatar weyn ama shilal xaasaasi ah.

3.2.2.2 *Tillaabada 2.* Haddii Taliyaha Boliisku uu talo ku soo bixiyo in shaqaalaha loo tixgaliyo loona qiimeeyo wax lagu kaalmayn karo, qofka taliyaha ah waa inuu diyaariyaa warbixin qoraal ah lagu muujinayo waxyaabaha gaarahaaneed oo shaqaalaha lagu caawinayo iyo fiyooboda uu xilkiisa ku gudan karo, iyadoo lagu darayo saamaynta ay u yeelan karto kartida si rasmi ah xilkiisa/xilkeeda u gudan karto.

3.2.2.3 *Tillaabada 3.* Marka uu Taliyaha Boliiska uu helo warbixinta uu soo diray horjoogaha, waxaa la qiimaynayaa arrinta. Taliyaha Bolisku waa inuu:

- Go'aamiyaa in walaacu aanu jirin, isla markaana aannu waxyeellaynayn kartida uu shaqaaluhu xilkiisa ku gudan karo, amaba dabeecadda kiiska haddii aan loo arkin in dhakaatiir iyo cid kalo xirfa gaara leh loo gudbiyo si loo daaweeyo; ama

- Ku taliyo qofka horjoogaha u ah in sii ilaalin lagu sii wado iyadoo la eegayo hadba siduu uga soo raynayo; ama

- Loo gudbiyo dad xirfad u leh daaweynta sii uu xilkiisa u guto.

Qabyta 4. Kala Duwaanaanshaha Shaqaalaha.

4.1 *Caddaynta Hadafka.* MPD waxay dib u xaqiijinaysaa inaynan jirin sinnaan la'aan lagu kacay marka shaqada la qorayo daraja kasta. Sida ay qabto MPD cidna midab kalasooc kuma samaynayso arrimah la xiriira go'aamada ku salaysan qolaqolada, asalka jinsiyadaha, halka uu ka yimid, lab ama dhaddig, diinta iyo jinsi doorashada. MPD waxay samaynaysaa dadaal weyn si ay u gaarto hadafyadeeda xagga carbinta, shaqaalaynta iyo dallacaadda dabaqadaha la ilaalinayo , iyadoo lagu darayo dadka midabka leh, Afrikaan Ameerikaan, Hindi Ameerikaan, dumarka iyo dadka itaalka daran si markaasi wax looga qabto tiraada hoos u dhaacaysa ee ka socda qaybahaan. Waxaa intaasi sii dheer in MPD ay si wadajira ugu halgamayso in waaxda boliisku noqoto mid ay ku:

- Ay qiimaynayso kala duwanaanshaha;
- Ay ku abuurayso fursado isku mid ah xagga shaqa qorista oo dadka oo dhan loo soo bandhigayo qaybahooda kala duwan;
- Ay abvuurayso jawi ay shaqaalaha oo dhan ku dareemi soo dhawayn qiima leh;
- Ay si karti ula shaqaynayso jaliyadaha si loo caddeyo tartamayaashu boliisku inay xoog saaraan xeerarka ay gudibyaan Waaxdu; iyo
- Ay ka taagantahay darajada sanaad ee qaraneed marka lala barbardhigo kala duwaanaanshaha uru boliis sida lagu soo qoray darasaadka sanad walba Waaxda Cadaaladda iyo FBIda.

4.2 *Horumarinta Istratijiyada Carbinta.*

4.2.1 *Ujeedada Caddaynta.* MPD waxay hormarinaysa siina wadaysaa istratijiyada carbinta iyadoo loola jeedo hagaajinta kala duwanaanshaha darajada kasta ee shaqaalaha; dhammaan shaqaalaha isku sharaxay inay buuxiyaan jagooyinkaas; tartamada darajad kasta iyo shaqooyinka waayo aragnimada iyo hoggamin laga rabo ha la soo xusho ama ha lagu soo magacaabo waaxda dhaxdeeda. Si loo horumariyo istratijiyadaa, MPD waxay dib u egeeysaa ayna tixgalinaysaa carbiskii ugu dambeeyay oo lagu guulastay dadaalladii uu ka sameeyay guddomiyaha Doug Belton iyo xubnaha Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan (Multicultural Recruitment Team). MPD waxay habkeeda ku darsanaysaa istratijoyinka waxsoosaarkooda dhowr jeer la isticmaali karo. Sidoo kale MPD waxay hirgelinaysaa isbadallo habkeeda shaqa qorista sida lagu soo xusay Background Investigation Unit Quality Assurance Report ee 2002.

4.2.2 *Isuduwaha Carbiska.* Waaxda Boliiska Minneapolis waxay u xilsaaraysaa saraakal sare inuu u noqdo Isuduwaha Carbiska oo masuul ka noqon doona inuu hirgaliyo istratijiyada rasmiga ee carbiska waaxda iyo iskuduwidda ku wajahan xagga PCRC.

4.2.3 *Ka Qaybgalka Jaaliyadaha.* Qayb kamid ah istratijada carbiska, Waaxda Boliiska Minneapolis iyo PCRC waxay samaynayaan ka qaybgal ku slaysan ururada jaaliyadaha. Ururadaan waxaa kamid ah balse aan ku koobnayn:

- Barbara Schneider Foundation
- American Indian Movement, Peacemaker Center
- A.W.M.I.N.
- Southeast Asian Community Council
- Chicanos Latinos Unidos en Servicios *(C.L.U.E.S.)*
- The City, Inc.
- Minneapolis American Indian Center, Metropolitan Urban Indian Directors
- Minneapolis Urban League
- Minnesota State Baptist Convention, Inc.
- OutFront Minnesota
- Somali American Friendship Association
- Upper Midwest American Indian Center
- Urban Coalition
- University of Minnesota Student Legal Services

4.2.4 *Caawimaada PCRC.* Ayadoo horumarinayso istraatijiyadeeda carbiska, MPD waxay la tashanaysa Golaha Xiriirka Jaaliyadaha iyo Boliiska (PCRC) si loo aqoonsado waax hortaagan; isla markaan lagu aqoonsado ururada jaaliyahada oo diyaar u ah inay MPD kala qaybgalaan ururada ku salaysan jaaliyadaha si ay gacan uga siyaan tababarrada carbiska ah ee lagu soo qorayo xubnaha kamidka ah jaaliyadahaas.

4.2.5 *Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan.* MPD waxay abuuraysa Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan ah oo loola jeedo:

- Aqoonsiga ilo xooggan oo ay MPD ka carbin karto dumarka, dadka madow Afrikaan Amerikaan, Hindi Ameriikaan iyo shaqsiyaadka GLBT;

- Aqoonsiga xayndaabyada u qorista shaqada iyo dallacsiinta dumarka, dadka midabka leh, Afrikaan Amerikaan, Hindi Ameriikaan iyo shaqsiyaadka GLBT;

- La horumariyo talooyin looga gudbayo xayndaabyada la aqoonsaday;

- Loo shaqeeyo MPD si loo abuuro ururada jaaliyadaha oo laga doonayo inay kala qaybqaataan Waaxda daadaalada carbiska ku aaddan; iyo

- Ilaalinta ka qaybgalka dumarka, dadka madow, Hindi Ameerikaan ee barnaamijka carbiska iyo warbixinnada laga helayo.

- Wixii kaloo carbis ah oo loo xilsaaro had iyo jeer.

- The PCRC waxay caddaynaysaa tababarka kooxda carbiska dhaqamada kala duwan ayadoo ku salaysan ururada doonaya inay kala qaybqaataan carbinta ay MPD ka wado xubnaha jaaliyadahaas waxayna la shaqaynaysa kooxda carbiska dhaqamada kala duwan aasaaskeeda iyo si wadidda xiriirkaas.

Kooxda waa inuu hoggamiyaa Isuduwaha Carbinta. Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan waxay diyaarinaysaa warbixin sanadeed, iyagoo tilmaamaya hawlihi ay soo qabteen iyagoo nukhul warbixinta siinaya PCRC. Warbixinta waa inay ku jirtaa dhismaha Kooxda, hoggaanka Kooxda, hadafka iyo bartilmaameedka Kooxda, miisaaniyadda Kooxda iyo wax ka qabadkii Kooxda xilliga warbixinta.

4.2.6 *Kooxda Bartilmaameedka.* MPD waxay sanad waliba dhammaadkiisa isugu yeraysaa koxda bartilmaameedka si loo dhiirrigaliyo soogalinta xubnaha jaaliyadaha saraakiil midad leh, Hindi Ameerikaan, Afrikaan Ameerikaan, dumarka, shaqsiyaadka GLBT iyo dad kamid ah tartamyaasha dhawaan la qoray sidii looga caawin laha istratijiyada carbis heer sare ah.

4.2.7 *Dib u eegista Tabaha ee lala yeesho PCRC.* MPD waxay sanad waliba dib u eegeysaa, dhammaanka xiritaanka maaliyadda sanadka, istratiijada carbinta ay la yeelanayso PCRC si lag ogaado socodsiinta hawlahaas iyo in laysku dayo in wax laga badalo carbiska haddii loo baahdo ama ay ku haboonyihiin.

4.3 *Kala Saaridda Tartamayaasha ee Qorista Hore.*

4.3.1 Wakiillada Jaaliyadaha metela ee PCRC waxay saldhigga u dhigaysaa caddaynteeda jaaliyadaha Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan rabitaanka ka qaybgalka waaxda tababaridda xubnaha jaaliyadaha iyo siday ula shaqayn lahayeen Kooxda Carbiska, si loo sii abuuro loona sii wado ka qaybgalkaas.

4.3.2 Wakiilka Jaaliyadda ee PCRC wuxuu si joogta ah uu ula shaqayn doona uuna ku gubabin doona ururada jaaliyadaha inay la yimaadaan waxyaabo u fududaynaya dadaallada MPD carbinteeda.

4.3.3 Wakiilka Jaaliyadda ee PCRC waxay shaqadeeda ku caddaynaysaa kuna wargalinaysaa Kooxda Carbinta Dhaqamada Kala Duwan ku leh saldhigga dhacdooyinka oo ay kooxdu uga faa'iidaysanayso ujeedoyinka ku aaddan ka qaybgalka carbiska.

4.3.4 Si loo taageero dalladda carbiska, MPD waxay ku boorinaysaa saraakiisha inay ka qaybqaataan saldhigga dhacdooyinka, mowduuca tixgalinta shaqaalaynta.

4.3.5 *Baarista Nafsiga.*

4.3.5.1 *Qiimaynta La Soo Bandhigayo.* MPD waxay kobcinaysaa qaababka lagu qiimaynayo sida xirfadda leh oo ay ku dhaqanto MPD kuna hoggaamiso baarisyadeeda nafsiga ee tartamaayaasha. Soo bandhigga qiimaynta noocaaso kale waa in ugu yaraan la sameeya hal mar sanadkii.

4.3.5.2 *Dib U Eegistagidda Marxaladaha Qiimaynta.* MPD iyo PCRC waxay dib u eegayaan qiimaynayaana marxaladaha baarista nafsiga. Qiimayntaasi waa inay ku jirto tixgalinta iyo ballarinta dadka xirfadlayaasha ah oo lagu hormarinayo dad kala duwan oo ay kmid yihiin saddex dhakhtar cilmi nafsii oo kala xaajonaya tuhunka sharci oo loo soo jeediyo tartamayaasha, barista lbadaad ku xita tii ore aan u cuntamin.

4.3.6 *Nidaamka Dib U Eeeista Shaqaalaynta.* MPD waxay samaynaysa dib u eegis nidaamka shaqaalaynteeda iyo inay diyaariso warbixin ku saabsan waxa ka soo baxay. Dib u eegistaan waxaa kamid ah qaddarinta tillaba kasta ee nidaamka iyo waxa u badan ee ka soo bixi kara ee saamaynaysa in dhaqamada kala duwan ay noqon kora waxa hortagaan qofka ku guulaysta nidaamka. Inta uu ka ogolyahay Qodobka Caadaysta Xogta Gobolka Minnesota, warbixinta waxa lala wadaagi doona PCRC.

4.4 *Kalasooca Darajooyinka La Dallacsiiyay/La Magacaabay.*

4.4.1 *Kala Saaridda Xirfadaha Lagu Kala Hormarayo.* MPD waxay diyaarinasaa qalabka loogu talagalay tababarka gaarka kuwaaso lagama maarmaan u ah horusocda shaqaalaha. MPD waxay si wayn u muujinaysaa tixglinaysaana ahmiyadda tartamayaasha jaaliyadaha kala midabka ah, Afrikaan Ameerikaan, dumarka, Hindi Ameerikaan, iyo shaqsiyaadka jaaliyadda GLBT, madaxda jaaliyadaha, maamulayaasha iyo kuwa siyaasadda jideeya inay ku daraan , laakiin aan la xadidin jagooyinka ay qabtaan aliflayda, saddexaliflayaasha, Taliyaha ERU, K-9 madaxdooda, xiddiglayaasha. Dhammaanayaasha, koormeerayaasha, ku xigeennaada, iyo ku xigeenka madaxa iyo jagoonyinka kale ee muhiimka ah. Aqbaarta noocaas ah waxaa loo haynayaa siyaabo lagu gaarsiiyo dhammaan xubanaha loo dhaariyay MPD. MPD waxay bixin doonta koobiga aqbaarta ee PCRC.

4.4.2 *Qorshaynta Daraajooyinka.* MPD waxey dhisi doontaa qorshe rasmi ah ee lagu kala helo dhammaan jagooyinkaas kor ku magacaaban. MPD waxay kormeeri doontaa ka qaybqaadashada askaarta dumarka ah, askarta madoow, askarta Hindi Ameerikaan ee qorshaha ka tirsan iyo in la daabaco warbxin koobaan ee jinsiga iyo midabka ee dadka ka qayb galaya barnaamijka.

4.4.3 *Warbixinta.* MPD waxay la ogtahay in helidda qalabka lagu soo sheegay Qaybta 4.4.1 wuxuu noqon karaa mid aan ku fillayn saamaynta kala duwanaanashaha iyo siyaasadaha lagu jideenayo jagooyinka. MPD waxay raad raacaysaa ka qaybalka shaaqalaheeda tababarrada noocas ah iyo helidda waayo aragnimada xaga jinsiyadaha, lab iyo dhaddig iyo dhammaan qaybaha la ilaalinayo. Markii xogtaan oo kale ay tilmaamayso dumarka ciidanka ah, ciidanka midabka leh, saraakiisha Hindi Ameerikaan aysan tiro fiican meesha ka joogin, MPD waxay si firfircoon u carbinaysaa kuna dhiirrigalinaysaa ka qaybgalka kuwa waakiilnimadoodu shaalaha ay hoosayso. MPD waxay faafinaysaa una gudbinaysaa PCRC warbixin sanadeedka oo lagu soo koobayo raad raaca xogta iyo dadaallada ku aaddan ka qaybgalka ciidanka sida dumarka, dadka midabka leh, saraakiisha Afrikaan Ameerikaan, iyo Hindi Ameerikaan.

4.4.4 *Barnaamijka Waanada.* Waaxda Boliiska Minneapolis waxay kordhinaysaa hirgalinaysaana barnaamij caqli celin ah oo a siinayo ciidnakoo dhan. MPD waxay ilaalinaysaa ka qaybgalka saraakiisha dumarka, ciidanka saraakiisha midabka leh, Askarta Hindi Ameerikaan. MPD waxay faafinaysaa warbixinta ayadoo hoosta laga xarriqayo tirakoobka dadka kala duwan ee ka qaybgalaya barnaamijkaan.

4.4.5 *Bandhigga Maareynta.* MPD waxay meel marinaysaa tala soojedinta Magaalada Minneapolis ee qaabka maareynta oo la xiriira adeegsiga muuqaallada hababka dib u eegista oo lagu caddaynayo laguna dhiirrigalinayo tartamayaal xooggan dhinaca dacaadda iyo helidda waayo aragnimada.

4.4.6 *Barnaamijka Horumarinta Hogaaminta Magaalada.* MPD waxay ogoshahay kuna dhirrigalinaysaa in laga qaybqaato Barnaamijka Horumarinta Hoggaaminta Magaalada. MPD waxay ilaalinaysaa ka qaybgalka dumarka, dadka midabka leh, Afrifaan Amerikaan, iyo Hindi Ameerikaan ee barnaamijkaan iyo inay waxa ay ku arkaan warbixin ka soo qoraan.

[1] "tirada dhiman" oo ku qeexan Magaca

4.4.7 *Barnaamijka Qaraj Celinta.* MPD waxey eegi doontaa siday ku dhisi lahayd barnaamij ay saraakiisha qarashka uga baxa waxbarashada, tacliin heer sare sii bartaa si markasii ay u korodho in rajada ah in la dallacsiiyo in qarajka laga kabo. MPD waxay kaloo ilaalinaysaa ka qaybgalka saraakiisha dumarka, saraakiisha midabka leh, saraakiisha Afrikaan Ameerikaan iyo saraakiisha Hindi Ameerikaan ee ka tirsan barnaamijka lacaga laysku celinayo. Hadday Magaalada sidaa ay go'aan ku gaarto in dhaqaalana loo helo, MPD waxay la kulmaysa lana xaajonaysaa Midowga Saraakiisha Boliiska Minneapolis ("Federation") ku saabsan shuruudaha iyo nidaamka barnaamijkaas.

4.5 *Hagaajinta Jawiga Shaqada.* MPD waxay doonaysaa inay sii waddo jawiga shaqada oo dhammaan shaqalaha u qalma ayna ka heli karaan fursado ay horay ugu socdaan.

4.5.1 MPD aydoo la tashanysa PCRC waxay samaynaysaa ku kormeer dhammaan shaqaaleheeda arrimaha ku wajahan fikradaha MPD ee jawiga shqada gaar ahaan haddii shaqaaluju haystaan fursado caddaalad ku dhisan ee xaggga horusocodnimada ee Waaxyda. Ka bacdi komeerka hore MPD waxay samynaysaa koormeero hadba waqti ah. Xogta warbixinnada waxa laga soo koobay waa la faafinayaa iyadoo lala qaybgalayo PCRC. Kormeerka waxaa loo sameynayaa qaab saraakiisha u ogolanaysaa sidii ay iskood uga jwaabi lahayeen waxa ay doonayaan.

4.5.2 The MPD waxay la shaqayn doonta Kooxda Carbiska Dhaqamada Kala Duwan iyo PCRC si u eegto natiijooyinka kormeerka iyo tala soo jeedinta oo lagu wajahayo laguna caddaynayo dhibaatooyinka.

4.5.3 PCRC waxay MPD gacan kala gaeysanaysaa raadinta dhaqaalaha lagu caawinayo hagidda jawiga shaqada kormeerka iyo hirgalinta talooyinka la soo gudbiyay.

4.6 *Fikradaha Shaqaalaynta.* Dhinacyadu waxay ogsoonyihiin in aanay jiri doonin shaqaale ka kooban kala duwanaanshaha mar hadday MPD ku lug yeelato joojinta shaqa qorista iyo dallacsiinta iyo dadaal kasta loogu jiray duwanaansha wuu iska lumayaa marka ruqso timaado. Sidaas darted MPD waxay horumarinaysaa istratijiyada miisaaniyadda si kor loogu qaado shaqa qoristeeda iyo dallaacadaba.

Qaybta 5. Dareemka Dhaqamada Xaasaasiga ah. Si loo garto loona aqoonsado kala duwanaanshaha jaaliyadaha dhaxdooda iyo MPD dhaxdeeda, MPD waxay la shaqaynaysaa Golaha Xiriirka Boliiska iyo madaxda jaaliyadaha kale, waxayna jaaliyadaha u carbinayaan sidii xiriiro iyo khubaro uga heli lahaayeen.

5.1 *Luqadaha.* MPD waxay aqoonsantahay in hawlaha jaaliyadaha iyo ilaalintoodaba in lagala kulmayo kala duwanaansho xagga dhaqanka, qolada, jinsiyidaha iyo jinsi doorashada. Sababtoo ah kala duwanaansha luqadaha darbi ayuu ku noqon karaaa isgaarsiinta, kaasoo ah mid ku xirin dhaqanka, MPD waxay oggoshahay in:

5.1.1 Qiimaynta sanadkiiba mar warbixinta luqadda inta badan looga hadlo Magaalada.

5.1.2 Faafinta dhammaan suugaanta sida joogtada ah ugu baahsan dadweynaha iyadoo luqaduhu ay ku jiraan laakiin aanay la xaddin kuwa soo socda:

- Ingiriisi
- Isbaanish
- Hmong
- Soomaali

5.1.3 Dib u eegid ayaa lagu samaynayo hadba waqti liiska luqadaha ee ku qoran qaybta 5.1.2 iyagoo noqonaya luqadaha sida joogtada ah looga hadlo Magaalada in markii loo bahana wax laga badalo.

5.1.4 Saraakiisha xiriirinta si loo caddeeyo luqadaha sida joogtada looga isticmaalo Magaalada iyo ogaanshaha luqadda ugu wax soo saarka badan si loogu loogu geysto isgaarsiin macna leh.

5.1.5 In lagu dhiirrigaliyo saraakiisha inay bartaan luqadaha an Ingiriisi ahayn iyo in la hormariyo qalabka lagu fududaynayo fursado xafiisyada ay khusayso.

5.1.6 MPD waxay ballan qaadaysaa dhaqaale buuran oo loo qoondaynayo hawlwadeennada si ay u helaan barashada luqadaha aan Ingiriis ahayn kaddib markii ay la kulmaan lana xaajoodaan Federashanka arrimaha la xiriira waqtiga iyo shuruudaha barnaamijka.

5.1.7 MPD waxay ku dareysaa tirakoobka warbixinta sanadka xogta la xiriirta siyaadada shaqaalaha bartay luqadaha aan Ingiriisi ahayn laguna muujiyo waxa ay luqadahaas yihiin.

5.2 *Tababarka.*

5.2.1 MPD iyadoo adeegsanaysa shaqaalaheeda waxay jaaliyadaha heshiis kul galaysaa tra kala duwanee dhaqamada iyo raad raacooda sidii ay gcan uga siin lahaayeen tababarka arrimaha la xiriira mowduucyada isku dhaafka ururada dakda dhaqamada, qolada, jinsiyadaha, ama jinsi doorashada.

5.2.2 Wakiillada jaaliyadaha ee PCRC iyagoo hawshooda si wata waxay ku dhiirigalinaysaa ururada jaliyadaha ku hoggaamiyaan dhacdooyin u sahlaya ka warqabidda dhaqamada ka dhaxeeya shaqaalaha MPD.

5.2.3 Wakiillada jaaliyadaha ee PCRC iyagoo hawshooda sii wata, waxay caddaynayaan isla markaana wargelinayaan MPD dhacdooyinka ku salaysan dhaqamada, taasoo looga faaidaysanayo sidii loo kordhin lahaa ka warqabka dhaqamada.

5.2.4 MPD waxay ku gubaabinaysaa shaqalaheeda inay ka qaybgalaan dhaqamada jaaliyadaha oo ku salaysan dhacdooyinka la xiriira mowduucyada tixgalinta shaqaalanyta, iyadoo loo ogolaanayo shqaalaha inay ka qabygalaan waxyaabaha caynkaas oo kale.

Qaybta 6. Sharciyaynta Eexda Qowmiyadaha (Racially Biased Policing). Sharciyaynta eexda qowmiyadaha waa tallaabo sharci dajiyuhu uu go'aan uga gaarayo arrimaha qowmiyadaha kaliya. Inta badanna waxaa lagu magacaabo "muqaalka qowmiyadaha," sharciyaynta qowmiyadaha khalad keliya ma aha balse waa sharci darro. MPD ma saamaxayso mana u dulqaadanayso nooc kasta ee kamid nidaamka eexda. Si loo wajaho cabashada jaaliyadaha ee ku sii fidaya shaqaalaha MPD oo ku lug leh nidaamka eexda, MPD waxay oggolaatay qodobada soo socda:

6.1 *Falanqayn iyo Cilmi Baaris Siyaada ah.* MPD waxay shaqaalaheeda la wadaysaa Golaha Dambiyada iyo Caddaaladda (Council on Crime and Justice) waxayna falanqaynaysaa xogta dheeraadka oo la xirriirta simafooraha ama joogsiyada uu gaadiidka istaago iyo shilalka dhaca ee dhexmara shicibka iyo boliiska ee ka isjooysyada jidadka Minneapolis. Noocyada gaarka ee xogtaas la ururuuriyay watigaas iyo adeegsiga xogtaas meelaaha ay deegaan ahaan uga dhacaan iyo brotokoolka ku saabsan in laga soo warbixiyo Golaha Dambiyada iyo Caddaaladda weli go'aan kama gaarin arrintaas. Si kastaba ha ahaatee MPD waxay uruurinaysaa xog si wada jira ay kula heshiiso PCRC iyadoo isku xireysaa laamaha kale. Iyadoo la adeegsanayo habka cusub ee 800 MHz xogta soo if baxday iyo wararka joqarafiga ayaa la diyaarinayaa si cid walba u hesho. Taas si loo hubiyo danaha jaaliyadaha iyo boliisku waxay wakiil uga noqonayaan sidii loo gaari laha go'aan wax ku ool ah inta marxaladan lagu jiro. Si loo hubiyo inay danaha jaaliyadaha iyo boliisku ay ku jiraan nidaamka go'aan looga gaarayo arrimahaan muhiimka ah, MPD waxay ku daraysaa Wakiillada Jaaliyadaha ee ka tirsan PCRC iyo Federashinka ka socda kooxda MPD ee la shaqeeya Golaha Dembiyada iyo Cadaaladda.

6.2 *Warbixinta.* MPD waxay ka soo warbixinaysaa brotokoolka sida wadajirka ula gaartay Golaha Dambiyada iyo Caddaaladda.

6.3 *Faafinta Kaararka Ganacsiga.* MPD waxay saraakiisheeda u qaybinaysaa kaararka ganacsiga iyo in sarkaal walbana uu siiyo kaarkiisa/kaarkeeda ciddii ka dalbata.

6.4 *Tababarka.* MPD waxay shaqaaleheeda u diyaarinaysa tabarro arrimaha ku cad Qaybta 9.

Qaybta 7. La Xisaabtanka Saraakiisha – Nidaamka Cabashada iyo Anshaxmarinta.

7.1 *La Xisaabtanka.* Dhaqanka Boliiska waxaa lagu xakumayaa buugga MPD, waxana lagu qaadaya xeerarka federaaliga. Sarkaalka boliiska haddii u ku fashilmo u hoggansannaanta nidaamka ku qoran buugga iyo sharciga sarkaalka waxaa lagu qaadayaa dishibliin.

7.2 *Habka Cabashada.* Si dadweynuhu ugu kalsoonaadaan waaxda boliiska , waaxdu waa inay diyaarisaa qaab wax ku ool ah shaqayna kara oo wax looga qaban karo eedaha la xariira dhaqan xumida boliiska. Waaxdu waxay kaloo ka doonaysaa qofka dacwoonaya inu soo gudbiyo waqti munaasaba macluumaadka cabashadiisa la xariira. Marxaladan muhiim uma aha kaliya sumcadda waaxda ee dadwenuhu ka qabo balse waaxdu waxay diyaarinaysaa sidii falka ku habboon loo qaadi lahaa.

7.2.1 MPD waxay diyariinaysaa ayna hirgalinaysaa hal foom oo mgaciisu yahay “Foomka Warbixinta Shilalka Boliiska” kaaso baarista lagu bilaabayo.

7.2.2 MPD waxay daabacaysaa diyaarinaysana Foomka Warbixinta Shilalka Boliiska kaasoo lagu darayo luqadaha haseyeeshe lagu xaddidin:

- Ingiriisi
- Isbaanish
- Hmong
- Soomaali

7.2.3 Arjiga dacwadda waxaa lagu soo hagaajinayaa Taliyaha Kooxda Arrimaha Gudaha (“IAU”) si loo eego. Dib u eegista hore ka bacdi, dacwadda waa la baaraya, waxana loo soo gudbbinayaa IAU ama taliyaha xafaddaas, haddii dib u eegista hore ay ku filantahay caddaynta in basar xumo aanay dhicin, dacwoodaha sidaa ayaa lagu wargalinayaa.

7.2.4 MPD waxay qabtaa si loo helo Foomka Warbixinta Shilalka Boliiska Minneapolis iyo qalabka caddaynayaa qaababka dacwadda in lagu diyaariyo dhammaan MPD xaafadaheeda, iyo ururrada jaaliyadaha, yadoo lagu darayo hasayeeshe aan lagu xaddidin:

- Barbara Schneider Foundation
- American Indian Movement, Peacemaker Center
- A.W.M.I.N.
- Minneapolis American Indian Center, Metropolitan Urban Indian Directors
- Southeast Asian Community Council
- Chicanos Latinos Unidos en Servicios (C.L.U.E.S.)
- The City, Inc.
- Minneapolis Urban League
- Minnesota State Baptist Convention, Inc.
- OutFront Minnesota
- Somali American Friendship Association
- Upper Midwest American Indian Center
- Urban Coalition
- University of Minnesota Student Legal Services

7.2.5 MPD waxay oggoshay in haaddooda loo sameeyo tababar xilliyeed shaqaalaheeda meelaha warqadaha laga heli karo dacwadaha ku saabsan, hababka warbixinnada shilalka.

7.2.6 MPD waxay u diyaarinaysaa horjoogayaasheeda tababarro la xiriira warqadaha dhaqanka Boliiska sida looga jawaabayo.

7.2.7 MPD waxay dib ugu noqonaysa Nidaamka Hababkeeda Baarista iyo Foomamka Tixraaca (PPI) si looga qaado luqadaha soo socda: “Dacwadaha ku salaysan kaliya dhibaataynta, qaababka edeb darrada lama oggolaan karo haddaysan arrimahaasi ay yihiin meel ka dhaca xeerka iyo hababka MPD ay ku hawlgasho”.

7.2.8 Arrimaha Gudaha waxay soo saarayaan warbxin sanadeed ee dib loogu eegayo hawlqabadka kooxda.

7.3 *Hababka Anshax-maritna.* Dastuurka Midowga Mareykanka iyo sharciga Minnesota waxay sheegayaan shaqaalaha hawlaha caamka ah in aan lagu qaadi karin anshax-marin dacwad la'aan, anshax-marintuna waa dacwad la qaadayo, iyadoo qofka shaqaaluhuna uu xaq u leeyaha inu racfaan ka qaato go'aanka iyo in arrinta loo xilsaaro cid xaqiiqda raadisa ama dhex-dhexaadin ay sameeyaan guddi rayid ah.

7.3.1 *Maqnaasha Mushaar Leh*. Marka qofka shaqaalaha hawlaha caamka oo loo soo jeediyo eedaymo culus, waa inu shaqada dibadda ka joogo inta arrintiisa la baarayo, iyadoo muddada uu shaqada ka maqanyahay mushaarkiisu u soconayo iyado sifo sharci mooye aan shaqalaha anshax-marin aan lagu qaadi karin.

7.3.2 *Doorashada Anshax-marinta.* Iyadoo la tixraacayo Xeerarka Anshx-marinta Shaqaalaha Raydka ah ee Minneapolis, anshax-marinta waa tababarid, canaan, canaan qoraal ah, shaqo ka joojin, hoos u casilid iyo shaqada oo laga siidaayo.

7.3.3 *Warbixinta Tillaaboyinka Anshax-marinta*. Sida uu qabo xeerarka Xukuumadda Minneapolis Data Practices Act, MPD waxay diyaarinaysaa warbixin sanadeed lagu soo koobayo dacwadahii ka dhanka aha ciidamada iyo go'aamidi laga gaaray iyado lagu soo darayo nooca dacwadaha iyo anshax-marinta lagu qaaday.

Qaybta 8. Ka Wareejinta Caruurta Guryaha/Lagu Meeleeyo Guri Kale

8.1 MPD waxay ogtahay caruurta oo laga wareejiyo gurigooda in aanay naxdin ku ahayn caruurta kaliya balse ay ku tahay naxdin reerka canugga iyo jaaliyadahaba. MPD waxay ogoshahay in la qaado tillaabooyinka si loo xaddado duruufaha keenay in canugga gurigiisa laga qaado, tillaabada noocaas ah waxaa loola jeeda in lagu ilaaliyo ammaanka canugga.

8.1.1 MPD waxay ka qaybgalaysaa waqtiyada kulamada hayadaha hoos ku qoran si ay ugala doodo arrimaha la xariira meelaynta iyo hababkeeda oo loo adeegsanayo caruurta guryahooda laga wareejinayo:

- Xabsiga
- SOS (Adeegyda Bulshada Daryeela)
- Goysgoyska Dugsiyada
- St. Joseph's
- Daryeelka Cunuga
- Degmada Hennepin

8.1.2 MPD oo kaashanaysa PCRC waxay ogoshahay inay dib u eegto;

- Arrimaha canuggas lagu wareejinaya ay dhici kato inay ku xirantahay arrin qowmiyad ah.
- Nidaamka iyo hababka hadda jira oo kor loogu qaadayo isbaddalka brotokool ku habboon.
- Sahminta daraasaad lagu hormarinayo masu'uuliyadda hawlaha dadweynaha iyadoo la raadinayo tartan la'aan guryo la dejiyo.

8.1.3 MPD waxay ogashahay inay askarta la shaqeeyaan wakaaladaha adeegyada bulshada ee u qalma si lagu ogaado haddii loo baahdo in canugga gurigiisa/geeda laga wado. Wargalintaan qoyska loo dirayo qoyska cunuga dhalay waxa lagu qorayaa luqad ay fahmayaan.

Qaybta 9. Tababarka. Dhinacyadu waxay aqoonsanyihiin in tababarka MPD shaqaalaheeda inu yahay mid saamayn wax ku ool ah ku reebaya qaabka is-dhaxgalka boliiska iyo jaaliyadaha. Marka la eego is-dhaafsiga danaha ka dhexeeya dhinacyada, MPD waxay oggoshahay in shaqaalaheeda heshiiskan ku barto hirgelisana sii wadidda tababarka barnaamijyada.

9.1 *Adeegsiga Xoogga.* MPD si ay u sii wado tababar sanadeedka wax ay ogoshahay dhammaan ciidanka loogu talagalay in xoog adeegsado xitaa kuwa keeni kara dhimashada. Tababarka noocaas ah waa in lagu soo dara mowduuca laakiin lama xaddidi karo:

9.1.1 Druufaha la oggolyahay adeegsiga xoogga dhimashada sababi kara waxaa xeerinaya MPD xeerkeeda.

9.1.2 Adeegsiga "Judo", farsamooyinka kale dagaalka laysaga dhowro iyo hababka difaaca.

9.1.3 Adeegsiga Farsamada Latertal Vascular Neck Restriaint (LVNR), oo qaab ahaan lamid ah sida juudada in qofka loo xakameey iyadoo la eegayo faraqa u u dhexeeya LVNR iyo Ceegada (choke hold). *Eeg qaybta 1.2.3.*

9.2 *Jirrada Maskaxda*

9.2.1 *Shaqaalaha CIT.* MPD waxay ogoshahay inay bixiso barnaamijyo tababaro oo ku saabsan Kooxda Gurmadka Aafooyinka (Crisis Intervention Team). Mowduucyada tababarka shaqaalaha CIT waxaa ku jira 40 saacadoo ee tababarka hore iyo mid laylis ee dhaca laba jeer sanadkiba. Mowduucyada tababarrada shaqaalaha CIT waxaa kamid ah:

9.2.1.1 Aqoonsiga qofka in maskaxda wax uga dhimanyihiin ama uu naafa yahay.

9.2.1.2 Isticmaalka qalabka sid yar wax u dila, juudada, adeegsiga farsamada dagaalka iyo qaababka kale difaaca qaboow.

9.2.1.3 MPD waxay ku kordhinaysaa aqoonsi qaran, khubaro oo ka caawiya tabarada kala duwan.

9.2.2 Inta tababarrada lagu jiro MPD waxey saraakiisha dhammaantooda ka siinaysaa oriyantashin la xiriira caafimaadka maskaxda iyo caafimaadka dhimirka iyo in saraakiisha oo idil tababar laga siiyo waxyaabaha u baahan in laga taxaddaro.

9.3 *Tababarka Luqadaha iyo Dhaqamada.* MPD waxay ogoshahay in ay u tababarto arrimaha la xiriira qowmiyadaha, kala duwanaansha dadka deggan Minneapolis.

9.3.1 Laga soo billaabo tababarkii xilliyadii jiilaalka 2004 iyo gugii 2005, MPD waxay waddaa tababar dhammaan ciidanka loo tababarayo waxyaabaha aan wax laga qaban ee qowmiyadaha, fikradaha dadka laga aamino (stereotypes), cuqdada iyo bursiinada caddaanka.

9.3.2 Tababar kale ee dhici doona xilliyada ku xiga oo sii socon doona, MPD waxay ogoshay in lagu daro mowduucyada karaanka sida dabcinta midabkalasooca, yasidda dhaqamada kale iyo caddanka isu haysta inuu sarraynta yahay, kamid ah daraasaha sanad walba ee adeegyada xilliga tababarka ay waaxdu wado.

9.3.3 MPD waxay ogoshahay inay shaqaalaheedu u diyaariso duruus luqadaha ku saabsan oo ku jiraan: Isbaanish, Hmong, Soomaali iyo Luqadda Baaqa ee Amerika (ASL).

9.4 *Nidaamka Eexda*

9.4.1 MPD waxay shaqaaleheeda weydiisanaysaa inay ka qaybqaataan tababarro sida laysago dhowro waxyaabaha sida qaldan loogu dhaqmo kaaso loo maleeyo eexasho.

9.4.2 MPD waxay saraakiisha oo idil ay ka rabtaa inay qaataan tababarka kus saabsan xaqa aadanaha, dhimista midabkalasooca iyo kala duwanaanshaha. MPD waxay qandaraas la galaysaa ururrada saraakiisha siinaysa tababar takhasusu ee qaybaha xuquuqda aadanaha, midabkalasooca iyo kala duwanaanshaha.

9.4.3 MPD waxay bixisaa barnaamijyo tababar ah kuwaaso dadka badidooda ee ka qaybqaadanaya aysan ahayn shqaalaha MPD.

9.4.4 Dhammaan tababarrada socda ee waajibka ee u socda shaqaalaha madaniga ee la dhaariyay iyo kuwaa kale ee rayadka ah ee MPD waa in lagu dhammeystiraa mudoo shan sano ee laga bilaabo Taariqda La Hirgaliyay Heshiiskaan.

9.4.5 MPD waxay ku kordhinaysaa tababarrada la soo xusay kuwa Qaybaha 9.4.1 iyo 9.4.2, tababarrada la siiyay kuwa dhibowga cusub iyo xilka tababarkaas waa in lagu fuliyo sidii loogu tala galay logana gudbo waqtiga tijaabada.

Section 10. Qalabka

10.1 *Telefoonka Gacanta.* MPD waxay ka warqabtaa dhammaan ciidammada wareega ee hawsha haya baahida ay u qabaan telefoonka gacanta waana in laga haqabtiraa. Waxyaabaha ay u baahanyihiin sida telefoonnada, turjumaada luqadaha, la tashiga hayadaha adeegga guud arrimaha la xiriira ka qaadista caruurta gurigooda iyo xiririn toos ah ee lala yeelanayo kuwa kale kabaya adeegga arrimaha ku xusan Qaybta 12 ee xagga hoose, MPD waxay horumarinaysaa qorshe lagu siinayo dhammaan kuwa xilka gudanaya telefoonka gacanta.

10.2 Si loo hagaajiyo tayada iyo hawl-wanaagga shaqaalaha, MPD waxay dib u eegaysaa wax qabadkii hore si shaqaalaha loo siiyo qalab ku filan oo ay xilkooda ku gutansia waraaqaha, foomamka, katiinadaha iyo teknooljidaha kale.

Qaybata 11. Miisaaniyadda. MPD iyado la tashanaysa PCRC, waxay diyarinaysaa Khrajyada loo baahanyaha in hawlahan lagu fuliyo Heshiiskaan oo ay uga raadinayso Golaha Magaalada (City Council) iyo meelihii kaloo laga heli karo kharajyada Heshiiskan.

Qaybta 12. Taariiqda Dhaqangalka. Heshiiskaan wuxuu dhaqangalayaa marka la meel mariyo (Ratification) wuxuuna noqonayaa mid dhinacyada oo dhan uu xafiiskooda uu uga dhaqan galo.

Qaybta 13. Taariiqda Ka Dhaqanbixidda. Heshiiskaan wuxuu dhacaya sanaguraaga shanaad ee taariiqda la hirgaliyay. Hase yeeshe hadii dhinacyada si wadajir ah ugu heshiyaan waxey cusboonaysiin karaan dhowr jeer oo kale oo kiiba yahay saddex sano.

Qaybta 14. Muqaalka, Cusbonaynta iyo Ilaalinta Heshiiskaan.

14.1 *PCRC.* Xilalka ugu muhimsan ee PCRC waa in ay ku shaqeyso hannaan ku dhisan is hawlgalin heshiiskan kormeeridda fulinta Heshiiskaan.

14.2 *Hanashada Dacwdaha.* MPD waxay u xilsaaraysaa hal jago ee si buuxda oo kormeeraya iyo iskuna xiraya hogaansanaanta shurudaha Heshiiska.

14.3 *Sanadka Koobaad iyo Labaad Kaddib Marka u Heshiiska Higalay.* Sandka koobaad iyo kan labaad ee ka dambeeya Taarqda Hirgalinta Heshiskaan, MPD waxay saddexdi biloodba warbixin siinaysa PCRC, Golaha Magaalada iyo Duqa Magalaada hadba horumarka laga gaaray fulinta Heshiskaan. Warbixin kasta waxaa lagu muujinayaa dib u dhacyada iyo waxyaabaha kale oo aan cabasho ka jirin, iyado MPD samaynaysa qorshe iyo jadwal lagu saxayo dhibaatoyinkaas.

14.4 *Sii Wadidda Warbixinta.* Lixdan (60) cisho gudoohood oo ku aaddaan sanaduraaga saddexaad ee dhaqangalka Heshiskaan iyo sanadguraaga kaa ka dambeeya, MPD waxay warbixin siinaysaa PCRC, Golaha Magaalada iyo Duqa Magaalada hadba wixii ka qabsoomay hirgalinta Heshiiskaan. Warbixin kasta waxaa lagu muujinayaa dib u dhacyada gaarka ah iyo waxyaabaha aan cabasho jirin sidoo qorshaha MPD iyo jadwalka lagu saxayo dhibaatooyinkaas.

14.5 *Dib U Sixidda.* Haddii ay dhacdo in dhinac kamid ah Heshiiska uu u hoggamsamiwaayo xeerka ku qoran dhinaca cabashada wataa wuxuu qoraal ku wargalinayaa dhinaca aan cabashada wadan, isagoo caddaynaya dib u dhaca jira iyo siyaabaha wax looga qabanayo dib u dhacaas. Dhinaca kale markay soo gaaarto wargalinta waa inuu qoraal kaga soo jawaaba 10 cisho gudohood. Dhinacyadu waa inay la shaqayaan PCRC si loo xalliyo muranka markiiba. Haddii dhinacyada ay iskood u xallin wayaan murankooda, dhinac kastoo kamid ah wuxuu la soo xiriir karaa Xiriirrada Adegyada Jaaliyadaha (CRS) ee Waaxda Garsoorka Midowga Maraykanka iyo in la codsado inay isku yimaadaan dhexdhexaadin si u fududeyaan in xal laga gaaro go’aanka laysku hayay.

14.6 *Guddihosaadka Cabashooyinka.* Xubno toban ee guddi hoosaadka ayaa abuura xubnoo ka kooban shan qofood ee ka socda ururada UCMT iyo kuwa ay u xilsaartay UCMT iyo saddex xubnood ee ka socda MPD iyo laba xubnood ee ka soocda Waaxda Xuquuqda Madaniga oo madax ka noqonaya guddiga.

14.7 *Cabashada*. Haddii ay dhacdo in PCRC aaminnsatahay in Taaliyaasha waaxyaha ay u hoggaansami waayaan qayb ka mid ah heshiiskaan, isla markaasna ay dhinacyadu murankooda xallin waayaan, guddi hoosaadka cabashooyinka arrinta ayuu baaris ku samaynayaa, wuxuuna si toos ah ugu soo gudbinayaa xogtiisa iyo talobixintiisa Guddiga Fulinta ee Golaha Magaalada. Arrimaha cabashada, dib u eegista sanadka, mushaar kordhinta iyo arrimaha kale oo si gaara loo eegayo waa hawlaha Guddiga Fulinta. Haddii Guddiga Fulintu uu ku fashalmo wax ka qabashada tala soo jeedinta PCRC amase go'aanka Guddiga Fulintu aanu ku filnayn wax ka qabashada arrinta, PCRC ayaa awood u leh in ay samayso dib u sixid.

BAALASHA LA SAXIIXAY AYAA XIGA

KOOXDA MIDOWGA JAALIYADAHA

_____
Reverend Ian D. Bethel, Sr. Co-Chair,
Community Unity Team Minnesota State
Baptist Convention, Inc.

_____
William Means
Co-Chair, Community Unity Team
Minnesota O.I.C. State Council

_____
Ronald Edwards
AAPA

_____
Clyde Bellecourt American
Indian Movement

_____
Evangelist Mary Flowers Spratt
A.W.M.I.N.

_____
Mark Anderson
Executive Director, Barbara Schneider Foundation

_____
Harry "Spike" Moss
The City, Inc.

_____
Zachary Metoyer
Federal Mediation Now, Inc.

Justin Huenemann
Co-Chairman, Metropolitan Urban Indian Directors

Anita Urvina Selin
Minneapolis Commission on Civil Rights

Gregory Gray Minneapolis
Urban League

Gloria Freeman
New Beginnings Baptist Tabernacle

Booker Hodges
New Directions Youth Ministry

Alfred Flowers
New Directions Youth Ministry

Doug Federhart
OutFront Minnesota

Marie Clark
University of Minnesota Student Representative

Tony Looking Elk
Urban Coalition

Michael Yang
Urban Coalition

WAAXDA CADAALADDA EE MIDOWGA MARAYKANKA
ADEEGYADA CILAAQAADKA JAALIYADAHA
(COMMUNITY RELATIONS SERVICE)

Patricia Glenn
Federal Mediator

WAAXDA BOLIISKA MINNEAPOLIS

Robert K. Olson
Taliyaha Boliiska

MARKHAATI KA AH XUBNAHA KOOXDA DHAXDHEXAADINTA

_____
Lucy Gerold
Taliya Xigeenka

_____
Sharon Lubinksi
Taliya Xigeenka

_____
Inspector (Isbettoraha) Robert Allen

_____
Inspector (Isbettoraha) Stacy Altonen

_____
Inspector (Isbettoraha) Tim Dolan

_____
Inspector (Isbettoraha) Donald Harris

_____
Sgt. Medaria Arradondo

_____
Sgt. Michael Davis

_____

Sgt. Duwayne Walker

_____

Officer (Sarkaalka) Mark Klukow

_____

Officer (Sarkaalka) Laura Turner

_____

Sgt. John Delmonico

_____

James P. Michels

_____

Xubinta Golaha, Paul Zerby, Second Ward

_____

Allan Bernard

_____

Vanne Owens-Hayes

_____

Eileen Kapaun